



Macluumaadka Bukaankaiyo

Taageerada qoysaska magangalyo doonka ah



Ka bilaabaya UK

Halkan iska Dhakhtarka Qoyska

Aad bay muhiim u tahay inaad si degdeg ah iska diiwaan geliso xafiiska Dhakhtarka. GP-yada (Dhakhaatiirta Qoyska) waa takhaatiir ka shaqeeya meelaha loo yaqaan xarumaha caafimaadka ama xarumaha. Dhakhaatiirta Qoyskagu wuxuu ku siin karaa gargaar bilaash ah, wuxuu ogaan karaa waxa khaldan wuxuuna ku siin karaa daawo. Qof kasta oo ku nool waddanka UK wuxuu Dhakhaatiirta Qoyska ku arki karaa bilaash. Tan waxaa ku jira dadka ka yimid dalal kale si ay u joogaan. Uma baahnid inaad muujiso meesha aad ku nooshahay, waraaqahaaga ama aqoonsigaaga si aad isu diiwaan geliso.



diiwaangeli



Iska diiwaan geli Dhakhtarka

Daryeelka ilkahaaga ayaa muhiim u ah adiga iyo ilmahaaga. Carruurta waxay si bilaash ah ugu tagi karaan Dhakhtarka ilkaha. Aad bay muhiim u tahay adiga iyo ilmahaaga inaad iska diiwaan gelisaan dhakhtarka ilkaha si loo hubiyo in ilkhoodu caafimaad qabaan. Haddii iliggu uu xanuunayo waa inaad wacdaa 111 oo aad waydiiso Adeegyada Daryeelka Ilkaha ee Degdegga ah.



ilkaha halkan



Booqo farmashiistahaaga

Farmashiyeaashu waxay kaa caawin karaan xanuuno yar-yar sida qufaca, hargabka, cune-xanuunka, finan, xanuunka caloosha iyo xanuunada kale ee fudud. Waxay ku siin karaan talo iyo daawo. Haddii aad u baahan tahay inaad aragto dhakhtar, farmashiistaha ayaa kuu sheegi doona meesha aad aadi karto si aad u hesho daryeelka saxda ah.



halkan ka eeg



Haddii aad ka walwalsan tahay caafimaadkaaga ama kan ilmahaaga oo aysan ahayn xaalad degdeg ah, waxaad sidoo kale wici kartaa

Ka wac 111 taleefanka Haddii aadan si fiican ugu hadlin Ingiriisiga, waxaad codsan kartaa turjumaan markaad wacdo.

Haddii ay tahay xaalad degdeg ah, fadlan wac 999 ama aad Waaxda Gurmada ee kuugu

Caawinta Greater Manchester

Waxaa jira meelo badan oo lagu caawiyo adiga iyo qoyskaaga:



Caawinta Muhaajiriinta

Caawimo lacag la'aan ah oo ku saabsan guriyeynta, talada sharciga, iyo magangalyada. Telefoon: **0808 8010 503**



Citizens Advice (Talada Muwaadiniinta)

Talo bilaash ah oo ku saabsan xuquuqdaada, gurigaaga, lacagtaada, iyo qaar kaloo badan. Telefoon: **0808 278 7800**



Caawinta Cuntada iyo Bulshada

Haddii aad u baahan tahay cunto, waxaad ka heli kartaa bangiyada cuntada halkan:

Waxaa sidoo kale jira kooxo sida Boaz Trust iyo Revive kuwaas oo qaxootiga iyo muhaajiriinta ka caawiya guryaha iyo taageerada bulshada.



Taageerada caafimaadka maskaxda iyo ladnaanta

Haddii aad dareento murugo ama walwal, waxaad wici kartaa **NHS 111** wakhti kasta oo aad dooran kartaa ikhtiyaarka 2.

Taageerada caafimaadka dhimirka ee carruurta adiga ama ilmahaagu waxaad sidoo kale aadi kartaan:

www.childline.org.uk ama wac **0800 1111**

Hay'adda Manchester Foundation Trust waxay leedahay bog internet oo leh ilo is-caawin ah, bogag internet iyo nambarro taleefan oo waxtar leh oo loogu talagalay dhalinyarada iyo



Si aad wax badan uga ogaato arrintan oo aad u awoodo inaad tan ku akhrido luqado kala duwan, fadlan booqo Waaxda Gurmada Carruurta Bogga internetka ee <https://mft.nhs.uk/rmch/services/paediatric-emergency-department/support-if-you-are-new-to-the-uk/>



Iskaan garee koodka QR si aad u booqato boggayaga internetka oo aad macluumaadkan ku akhrido